

JAMHUURIYADDA		SOMALILAND
FAAFINTA RASMIGA AH		
SOMALILAND REPUBLIC OFFICIAL GAZETTE	الْجُمْهُورِيَّةُ الرَّسْمِيَّةُ لْجُمْهُورِيَّةِ صُومَالِيْلَانْد	
XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA, MADAXTOOYADDA JSL, HARGEYSA, <i>E-mail: Garyaqaankaguud@gmail.com</i>		
Sanadka: 1aad	Cadadka: 4aad ee Abriil	Taariikh: 05/05/2012
QIIMAHA CADADKA: SL. Sh.		
RUKUNKA (Subscription):		
<i>QIIMAHA FAAFINTA AAN DAWLIGA AHAYN ee Qaybta Shanaad: Sadarkii kastaba SL. Sh.</i>		

CADAD GAAR AH OO LAGU SOO SAARAY MIISAANIYADDA JSL EE 2012

<u>QAYBTA KOWAAD:</u> XEERARKA	Bogga
BAARLAMAANKA IYO XEER	
NIDAAMIYAYAASHA: <ul style="list-style-type: none">• GO'AANKA GOLAHA WAKIILADA EE ANSIXINTA MIISAANIYADDA DAWLADDA EE 2012ka, IYO LIFAAQYADA KU LAMAAN.	260
<u>QAYBTA LABAAD:</u> XEER	264
NIDAAMIYAYAASHA IYO	
DIKREETOYINKA	
MADAXWEYNAHA:	
<ul style="list-style-type: none">• XEER MADAXWEYNE Lr: 0225/042012 Dhaqan-galka Miisaniyad Sanadeedka 2012-ka.	266
<u>QAYBTA SADEXAAD:</u>	

<p>DIGREETOYINKA,</p> <p>WAREEGTOOYINKA,</p> <p>AMARADA IYO XEER</p> <p>NIDAAMIYAYAASHA</p> <p>WASIIRADA, IWM</p> <ul style="list-style-type: none"> • Dhaqan-Gelinta Wasiirka Maaliyadda ee Miisaaniyadda 2012. 	
--	--

QAYBTA KOWAAD:

**XEERARKA BAARLAMAANKA IYO XEER
NIDAAMIYAYAASHA:**

**GO’AANKA ANSIXINTA MIISAANIYADDA DAWLADDA EE
2012ka, IYO LIFAAQYADA KU LAMAAN**

MARKUU ARKAY: Qodobada **54aad** iyo **55aad** ee Dastuurka Qaranka.

MARKUU DHEGAYSTAY: Xog-waranka **Wasiirka Wasaaradda Maaliyaddu** Ku iftiimiyay odoroska miisaaniyadda Dawladda ee **2012da**

MARKUU DHEGAYSTAY: Xog warankii soo jeedinta iyo talooyinkii Guddi **Hoosaadka Dhaqaalaha** ee Golaha Wakiiladda.

MARKUU KA DOODAY: Qaybaha kala duwan ee Miisaaniyadu ka kooban tahay.

MARKUU U CODEEYAY: Ansixinta odoroska **Miisaaniyada Dawladda** ee sanadka **2012ka** iyo lifaaqyada ku lammaan, kal- Fadhigii **17aad** fadhigisi **27aad** ee **03/04/2012** oo ay goob joog ahaayeen **57 Mudane** oo ka mid ah mudanayaasha Golaha Wakiiladda.

WUXUU COD AQLABIYAD AH (36 COD) OO GACANTAAG AH KU ANSIXIYAY

1. Odoroska miisaaniyada **Dawlada Dhexe, Dawlada Hoose, Baanka Dhexe, Dekada Berbera, Wakaaladaha Biyaha, Taakulaynta Gobolada Bari 2%, Haamaha Shidaalka Berbera, Haayada Wadooyinka, Warshada laydhka Hargaysa, Warshada laydhka Berbera, Madbacada Qaranka, Wasaarada Duulista Iyo Hawada,** ee **2012ka** oo qadarkeedu dhan yahay **886,496,529,998 SI.Sh (Sideed Boqol Iyo lix iyo sideetan Bilyan, Afar Boqol iyo lix iyo sagaashan**

**milyan, Shan boqol iyo Sigaal iyo laabatan kun,
sagaal boqol iyo sided iyo sagaashan shilin)**

2. Miisaaniyada Maamulka Dawlada Hoose:	67,768,503,889
Miisaaniyada Baanka Dhexe	40,188,244,903
Miisaaniyada Dekadda Berbera	39, 609,088,797
Miisaaniyada Wakaladaha Biyaha	37,944,566,499
Taakulaynta Gobolada Bariga 2%	22,574,633,428
Miisaaniyada Haamaha Shidaalka Berbera	11,206,278,000
Haayada Wadooyinka	9,026,125,720
Miisaaniyada Warshada laydhka ee Hargaysa	8,455,500,000
Miisaaniyada Warshada laydhka ee Berbera	5,880,159,420
Miisaaniyada Madbacada Qaranka	3,056,448,862
Wasaarada Duulista & Hawada	1,417,740,000

**3. Lifaagyada ku lamaan ee Lagu Ansixiyey
Miisaniyada:-**

b. Lifaaqa 1aad :-Wax ka badalka tacriifadaha
cashuuraha Wasaarada Hawlaha Guud,
Wasaarada Ganacsiga, Wasaarada
Qorshaynta Wasaarada Maaliyada, Wasaarada
Caafimaadka,Wasaarada Hormarinta Deeganka
Wasaarada Xanaanada Xoolaha,
Wasaarada Warfaafinta ,Wasaarada Beeraha ,

Wasaarada Boosaha Iyo Isgaadhsiinta
,Wasaarada Cadaalada, Haayada
Shaqaalaha Dawlada ee sanadka **2012**

t. Lifaaqa 2aad :- Siyaasada Guud ee Miisaniyada

j. Lifaaqa 3aad Waxka badalka Miisaniyada ee
Wasaarada Arimaha Gudaha ,Hayada Xuquuqul
Insaanka ,Guddida baadhista Xasuuqa,
Komishanka Doorashooyinka iyo Wasaarada
Maaliyada.

**4. Talo soo jeedinta Golaha Wakiilada ee Miisaniyada
Qaranka ee 2012 :-**

1. Soo dhamaystirka shuruucda Komishanka iyo Hay'adaha aan wali Golaha La horkeenin
2. In Miisaaniyada Golaha La hor keeno Dhamaadka December ama horaanta January sanad kasta
3. In la tix galiyo Cabashada Miisaaniyada ee

b. Waaxda Garsoorka

t. Golayaasha Qaranka

j. Wadada Sanaag

Ansixinta Miisaaniyada iyo Lifaaqyada ku lamaan waxaa **ka aamusay (19 Mudane)** waxa diiday Hal**(1)** Mudane, Gudoomiyuhuna muu codayn sida caadada ah.

Miisaaniyadani waxay dhaqan gelaysoo marka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland soo saaro Digreetada dhaqangelinta.

ALLAA MAHADLE

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xog.Guud ee Golaha Wakiilada

C/raxmaan Maxamed C/laahi (Cirro)
Gudoomiyaha Golaha Wakiilada

QAYBTA LABAAD:

**XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO
DIKREETOYINKA MADAXWEYNAHA:**

JSL/M/XERM/249-1026/042012

07/04/12

XEER MADAXWEYNE Lr:

0225/042012

Dhaqan-galka Miisaaniyad

Sanadeedka 2012-ka

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Go'aanka Golaha Wakiilada, Go'aan Lr.
GW/KF-17/559/2012 ee ku taariikhaysan
04/04/2012 ee ay ku ansixiyeen

Miisaaniyadda Sannadka 2012-ka ee Dawladda Dhexe, Dawladda Hoose, Baanka Dhexe, Dekedda Berbera, Wakaaladaha Biyaha, Taakulaynta Gobollada Bari 2%, Haamaha Shidaalka Berbera, Hay'adda Wadooyinka, Warshadda Laydhka Hargeysa, Warshadda Laydhka Berbera, Madbacadda Qaranka, Wasaaradda Duulista iyo Hawada iyo Lifaaqyada ku lamaan;

Wuxuu Soo Saaray

Xeerkan oo lagu baahinayo dhaqan-galka Miisaaniyad Sanadeedka 2012-ka ee Dawladda Dhexe, Dawladda Hoose, Baanka Dhexe, Dekedda Berbera, Wakaaladaha Biyaha, Taakulaynta Gobollada Bari 2%, Haamaha Shidaalka Berbera, Hay'adda Wadooyinka, Warshada Laydhka Hargeysa, Warshada Laydhka Berbera, Madbacadda Qaranka, Wasaaradda Duulista iyo Hawada iyo Lifaaqyada ku lamaan.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

QAYBTA SADEXAAD:

DIGREETOOYINKA, WAREEGTOOYINKA,

AMARADA

IYO XEER NIDAAMIYAYAASHA WASIIRADA,

IWM

REPUBLIC OF  SOMALILAND
MINISTRY OF FINANCE
Minister Office

Date: 18-04-2012

Ref: WM/02/08-01/ /2012

Ku: Dhamaan Wasaradaha iyo Hayadaha Dawlada	-Hargeysa-
Ku: Dhamaan Taliyeyaasha Ciidamada JSL	-Hargeysa-
Ku:Hantidhawraha Guud ee Qaranka	-Hargeysa-
Ku:Xisaabiyaha Guud ee Dawladda	-Hargeysa-
Og:Dhamaan Agaasime Waaxeedyadda W/Maaliyadda	-Hargeysa-
Og:Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda	-Hargeysa-
Og:Wasiiru Dawlaha Wasaaradda Maaliyadda	-Hargeysa-
Og:Shirgudoonka Golaha Wakiiladda JSL	-Hargeysa-
Og: Shirgudoonka Golaha Guurtida JSL	-Hargeysa-
Og:Madax weyne ku xigeenka JSL	-Hargeysa-

Ujeedo:Dhaqan-Gelinta Miisaaniyadda 2012:-

Anaga oo fulinayna go'aanka Ansixinta Miisaaniyadda 2012 ee Golaha Wakiiladda **Lr. GW/G/KF-17/559/2012** ee 04-04-2012 iyo digreetada Madaxweynaha **JSL/M/XERM/249-1026/042012** ee 07-04-2012 iyo xeer Madaxweyne **Lr.0225/0421012** ee 07-04-2012 oo lagu baahiyey Dhaqan Galka Miisaaniyadda sanadka 2012.

Waxaan halkan idiinku soo gudbinayaa nidaamkii iyo tilmaamihii loogu dhaqmi lahaa Miisaaniyadda sanadka 2012,oo ka kooban Dakhli iyo Kharashba.

1. Dakhliga:-

Dhamaan Wasaaradaha Dawladda Dhexe iyo Hayadaha Dawliga ah ee u xilsaaran Dakhli ururinta waxaa lagu adkaynayaa inay u hawlgalaan qiyaasta Dakhli ee laga rabo inay soo xareeyaan,ee ku tilmaaman shaxda deegamaynta halkan ku lifaaqan, idinkoo raacaya shuruucda, Tacriifadaha iyo hab

xisaabeedka Dawladda,kuwaas oo wareegtooyin gaara la idiinku soo gudbiyey.

Waxa kale oo xusid mudan in madaxda sare ee Hayadaha Dakhli ururintu iska saaraan xil dabagalka,soo xaraynta iyo ogaanshaha heerka dakhliga (kor u kaca iyo hoos u dhacaba).

2. Kharashka :-

Kharashka Miisaaniyadda sanadka 2012 waxa uu ku salaysnaan doona hadba inta uu yahay Dakhliga ina soo gala,taas oo la idinku wargelin doono wareegto hadaba xaaladu sida ay tahay saddexdii biloodba hal mar.

Iyadoo laga duulaayo qaabkaas ah isku dheelitirka Dakhliga, Kharashka iyo shuruucda Maaliyadeed,waxaa la raaci doona qodobadan hoos ku qoran :-

I. Kharashyada la hakiyey ilaa Wakhti danbe:-

- Kharashka dhismayaasha iyo Wadooyinka
- Kharashka Daryeelka Ceelasha
- Kharashka Iibsiga Hantida noockastoo uu yahay
- Kharashka Noolka Safarada Dibada
- Kharashka Safarada Gudaha
- Kharashka Mashruuca Tarminta dhirta
- Kharashyada Data-baseka iyo Cilmi Baadhista(**Economic Research**)
- Kharashaadka Gaarka ah
- Kharashka Kabka Raashinka
- Kharashka bixinta Magaha
- Kharashka Dhiirigelinta Shaqaalaha

II. Kharashyada 20% ka mid ah la hakiyey

ilaa wakhti dambe :-

- Spare Parts
- Stationery
- Martiqaadyada iyo Munaasabadaha.
- Tababarada
- Talaalka Xoolaha

- Habeen dhaxyada
- Kharashka Caafimaadka
- Isgaadhsiinta
- Kharashyada Yaryar

III. Waxa reeban in la galo kharash dheeraad ah "**Over Expenditure**" oo ka baxsan Miisaaniyadda, eeg xeerka nidaamiyaha xisaabaadka Dawladda Qodobkiisa **17** ^{aad} Xubintiisa **1** ^{aad}.

IV. Waa inaan isticmaalka kharashyada lagu koobin magaalada Madaxda oo kaliya ee lagu fidiyo ,laguna baahiyo dhamaan xafiisyada Gobolada & Degmooyinka Dalka, iyadoo la raacayo habka waaranada si loo af jaro cabashooyinka ka yimaada Gobolada iyo Degmooyinka.

V. In awooda kharashka (**Warrant**) ay gaadhaan dhamaan Gobolada & Degmooyinka ,saddex bilood walba bisha u horaysa ,una soo diraan

xisaab celin xaruntooda maamul saddex bilood walba.

VI. Sida ku cad Qodobka **54^{aad}** ee xeer Nidaamiyaha Xisaabaadka, waa in Wasaaradduhu saddex biloodkiiba hal mar u soo gudbiyaan xisaab celintooda guud Wasaaradda Maaliyadda.

VII. Biilasha taagan ee ka soo hadhay sanadkii hore ee 2011 waxaa loo bixin doonaa qaabka ay ku baxaan kharashyada Miisaaniyaddu.

3. Kala wareejinta Miisaaniyadda (Budget Variation):-

Sida uu qeexaayo Qodobka **16^{aad}** xarafkiisa **3^{aad}** ee xeerka Maamulka Maaliyadda iyo Xisabaadka ,wixii kala wareejin Madax xigayaasha waxay ka bilaabmi doonaan **1- July** waxaa ka reeban in kharashka Shaqaalaha iyo Hantida raagta wax laga wareejiyo.

4. Fulinta Siyaasada 2012 :-

Sida ku cad go'aanka Golaha Wakiilada ee kor ku xusan waxa lagu ansixiyey lifaaqa Siyaasada

Miisaaniyadda 2012,waxaan halkan idiinku soo gudbinayaa Qodobada ugu muhiimsan ee u baahan inaynu si wada jira u fulino waana sidan :-

- ➡ In wixii Hayadaha Caalamiga ah ku caawiyaan Hayadaha Dawladda heshiisyadooda loo soo gudbiyo Wasaaradda Maaliyadda iyo Wasaaradda Qorsheynta Qaranka,sidoo kalena xisaab celintooda bil kasta loo soo gudbiyo Wasaaradda Maaliyadda.
- ➡ In shirkadaha Maalgashiga ee ganacsi nooc kasta oo uu yahay lacagaha ay bixiyaan lagu shubo khasnada Dawladda .

5. Hantida Dawladda :-

Hanti kasta oo Qaran,ha noqoto mid guurto ah ama ma guurto ah ,waa in ay lahaataa Diiwaanada kala duwan ee sharcigu qeexaayo ,kuna sugnaata xanaanayn iyo daryeel fiican.

Waxaa Wasaaraddaha iyo Hayadaha laga codsanayaa inay Wasaaradda Maaliyadda u soo

gudbiyaan Warbixinta Hantidaas ay u xil saran yihiin, iyaga oo raacaya wareegtadii iyo foomamkii ay Wasaaradda Maaliyaddu hore u soo gudbisay.

Board of Survey:-

Waxaa intaas dheer ,sida uu qoraayo xeer nidaamiyaha Bakhaarada Qodobkiisa **Lr.110** aad in sanadkan la samayn doono Guddi Kormeerta Hantida Dawladda (**Board of Survey**).

Sidaas darteed;waxaa la idin xasuusinayaa inaad si rasmi ah ugu diyaar noqotaan, idinka oo nooc kasta oo hantiyeed galinaaya diiwaanada u gaarka ah.

Gebo Gebo:-

Mudanayaal;inkasta oo dhaqaalaha dalku aanu ahayn mid xoogan,maadaama aanu jirin wax soo saar badan oo dalku dhoofiyo hadana dhaqaalaheenu waa mid marba marka ka dambaysa soo xoogaysanaya,waxaanan gebagabadii idinla socodsiinayaa in yoolka Wasaaaddani yahay in Miisaaniyadda sanadkan 2012 ay si dhab ah u hirgasho sidii sanadkii 2011kii, isla markaana laga

ariko isbedelka aan kor ku soo sheegnay anagoo ku
raja weyn inaad dhinaciina wax nagala qaban
doontaan, la'aantiina aanay suurta galayn.

Allaa Mahad Leh

(C/casiis Maxamed Samaale)

Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.